Mashruuca La-Xiriirista Dhibbanaha

Hordhaac ku saabsan Adeegga Dhaqancelinta Qaranka iyo Mashruuca La-xiriirista Dhibbanaha

Ku saabsan Mashruuca La-xiriirista Dhibbanaha NPS

Adeegga Dhaqancelinta Qaranka (National Probation Service - NPS), booliiska ama Waaxda Daryeelka Markhaatiga ayaa kuu soo gudbinaya qoraalkan oo warbixin kaa siinaya Mashruuca La-xiriirista Dhibbanaha ee adeegga dhaqancelinta. Adeegga dhaqqancelinta qaybteeda Mashruuca La-xiriirista Dhibbaha waajib sharci ah ayaa ka saaran inay kula soo xiriiraan maadaama aa tahay, ama qof kuu dhow uu yahay dhibbane lagula kacay xadgudub galmo ama mid gacan ka hadal ah kaasoo keenay in qofkii dambiga gaystay loo xiro muddo 12 bilood ah ama wax ka badan, ama in qofkaasi lagu xiro cisbitaal iyadoo xayiraado la saaray sii dayntiisa.

Maxaa xiga ee dhacaya?

Booliiska ayaa faahfaahintaada u gudbinaya Mashruuca La-xiriirista Dhibbanaha haddii aadan sidaas waxba ka qabin. Sarkaalka xiriirinta dhibbanaha ayaa kugula soo xiriiri doonta khadka telefonka ama waraaq si laguugu sameeyo ballan ka dhacda gurigaaga ama meel kale oo kuu habboon. Sarkaalku waxa uu hubinayaa inay ku hayso baahi gaar ah oo la tixgeliyo. Tusaale ahaan, waxaad u baahan karftaa turjumaan. Haddii aad sarkaalka la kulantid waxaa kaloo kusoo wehelin kara saaxiib ama mutaddawac ka socda Kaalmaynta Dhibbanaha (Victim Support).

Sarkaalku waa inuu kugula soo xiriiraa siddeed usbuuc gudohood kadib marka maxkamaddu xukunto dambiilaha. Haddii aad doonaysid inaad markaas ka hor la xiriirtid sarkaalka waxaad telefoon u diri kartaa xarunta dhaqancelinta degaankaaga (lambarkooda waxaad ka helaysaa diiwaanka telefoonka degaanka aad deggan tahay)) waxaadna ka codsataa inay kugu xiraan Waaxda La-xiriirka Dhibbanaha.

Inaad hawshan ka qaybqaadatid waa mid dhammaanteed mutaaddawicid ah, waadna beddeli kartaa rabitanaka aad kula xiriiraysid sarkaalka xiriirka dhibbanaha goor kasta marka la xukumo dambiilaha.

Maxaan filan karaa haddii aan la kulmo sarkaalka xiriirinta dhibbanaha?

Sarkaalku waxa uu:

- Hubinayaa haddii aad walaac degdeg ah ka qabtid fikradda dambiiluhu kaa qabo
- Kuu sheegi doonaa sida loo isticmaalayo warbixinta aad siinaysid Mashruuca La-xiriirista Dhibbanaha
- Ku siinayaa warbixin ku saabsan nidaamka caddaaladda dambiyada iyo habka ay xabsiyada iyo cisbitaallada lagu hayo dambiilayaasha ay u shaqeeyaan
- Kuu sharraxayaa macnaha xukunka lagu riday dambiilaha iyo sida loo go'aamiyo muddada qof dambiile ahi uu ku jirayo xabsiga ama cisbitaalka
- Ku weydiinayaa sida aad doonaysid in laguula socodsiiyo wixii ku soo kordha xilliga uu dambiiluhu ku jiro xukunka (tusaale ahaan, marka maxbuuska lagu wareejiyo qayb kale oo xabsiga ama cisbitaalka ah)
- Ku siinayaa warbixin ku saabsan adeegyada kale ee ka socda degaanka ee ku caawin kara

Maxaa dhacaya haddii aan xiriir joogto ah la lahaado sarkaalka xiriirinta dhibbanaha muddada dambiiluhu xukunka dhammaysanayo?

Haddii aad go'aansatid in aad sarkaalka xiriir la lahaatid, waxa sarkaalku:

- Kuu sharrxayaa aragtida aad ka dhiiban kartid xaaladda uu ku sugnaanayo dambiiluhu marka uu ugu dambayn dhammaysto xabsiga ama cisbitaalka. Waxaad codsan kartaa in shuruud looga dhigo inuusan kula soo xiriirin adiga ama qoyska.
- Kuu sheegayaa markii la sii daayo dambiilaha iyo wixii shuruud ah ee ku khusaysa
- Kula yeelanayaa xiriir joogto ah muddada dambiilaha lagu hayo kormeerka bulshada dhexdeeda ah iyo in lagula socodsiiyo waqtiga dambiiluhu ka baxayo kormeerkaas

Lambarro kale oo muhiim ah

Khadka Caawimada Dhibbanaha ee Adeegga Xabsiyada
0845 7585 112

Waxaad khadkan wici kartaa haddaad ka walaacsan tahay xiriir ka imanaya qof maxbuus ah.

Shaqaalaha khadkaasi waxay farriintaada u gudbinayaan guddoomiyaha xabsiga, oo baaritaan samaynaya kadibna go'aan qaadanaya. Waxa kormeer lagu samayn karaa xiriirka ama telefoonnada kaaga imanaya maxbuuska. Shaqaalaha telefoonku kuma siin karaan warbixinta shakhis maxbuus ah laakiin waxay kuu sheegayaan sida cabashadaada wax looga qabtay.

Kaalmaynta Dhibbanaha
0845 30 30 900

Kaalmaynata Dhibbanaha (Victim Support) waa hay'ad qaran oo taageerta dadka ay saameeyaan dambiyadu. Waa hay'ad madaxbannaan waxayna bixisaa adeeg asturan oo lacag la'aan aha oo u furan dhammaan qaybaha bulshada. Mutaddawiciinta u shaqeeya waxay bixin karaan kaalmo niyad iyo mid muuqataba isugu jirta.

Cabashooyinka

Haddii aad cabasho ka qabtid adeegga aad heshid fadlan la hadal sarkaalka xiriirnta dhibbanaha ama maamulahooda, oo isku dayi doona in lagu caawiyo. Haddii aysan taasi kuu shaqaynin ama aadan doonayn inaad la hadashid maamulaha, waxaad qooraal ahaan cabasho ugu diri kartaa Madaxa Saraakiisha adeegga dhaqancelinta ee degaanka aad ku nooshahay. Haddii aadan ku qancin waxaad cabasho u gudbin kartaa guddiga dhaqancelinta degaanka oo walaacaaga baari doona. Haddii NPS ay xallin kari weydo cabashadaada, marxaladda ugu dambaysa waxa racfaankeedu marayaa Xubinta Baarlamaanka (MP), oo cabashadaada gaarsiin kara Garqaadista Baarlamaanka (Parliamentary Ombudsman).

Su'aalaha iyo warbixin dheeraad ah

Haddii aad wax su'aal ah ka qabtid warbixinta ku jirta qoraalka, ama doonaysid inaad walaac degdeg ah kala hadashid sarkaalka xiriirinta dhibbanaha, waxaad la xiriiri kartaa xafiiska adeegga dhaqancelinta degaanka aad deggan tahay.

Fadlan codso haddii aad doonaysid in qoraalkan laguugu turjumo luqad kale.